



Somaliska

Warbixin ku socota waalidiinta iyo waalid masuulka(vårdnadshavare)

Warqadani waxay ku socotaa waalidiinta ama waalid masuulka leh caruur dhigata dugsiga Kronan ama dugsiga wakhtiga fasaxa ee Kronan (fritidshem). Warqadaan waxaa loo fasiray luqado badan oo kala duwan laakiin macluumaadka ku qoran waa isku mid, luqaday doonto ha ku qornaatee.

Khamiistii 22-ka bisha oktoobara waxaa ka dhacay kronan dhacdo aad u naxdin badan. Caruurta, ardayda iyo shaqaalahaba saamayn kal duwan bay ku yeelatay dhacdadaasi, waxay sidoo kale dhac-dadani ku sii jiri doontaa madaxeena oo mudo dheer baan xasuusnaan doonaa. Hadaba si kastoo wax u dhaceen waa inaan hore uga sii soconaa, wakhtiga ayaa ina saacidi doona inaan sidaas yeel-no. Markaa sababtaa aawadeed baan hadda idinku salaamayna inaad dib ugu soo dhawaataan Kronan, marka dugsiga dib loo furo 2-da bisha noofembar.

Ilaa iyo wixii ka danbeeyey dhacdadii khamiistii dhacday, waxay dhamaan shaqaalah ka kala socda Kronan iyo dhamaan shaqaalah kale ee degmada iyga oo xidhiidh dhaw la sameynaya ciidanka booliiska ka shaqaynayeen sidii loogu diyaar garoobi lahaa maalinta mar kale dib loo furayo Kronan. Waxaan idii cadaynaynaa in aan samayno intii karaankaya ah sidii aan ugu abuurno jawi xasiloon iyo mid nabadjelyo caruurt iyo ardaydaba, waxaan rajaynaynaa in idinka ka waalid ahaan iyo waalid masuul ahaanba aad sidoo kale dareentaan xasilooni isla markaana caruurtiina si fiican loo gacan qabanayo doono.

Si dib ugu soo noqoshada dugsigu u noqot mid degen oo xasiloon, waxaan qaadnay talaabiyinkan hoos ku xusan. Tani waxay jiri doontaa ilaa ogaysiin danmbe.

- Iridka weyna ee laga soo galayo iyo iradaha kaleba ee laga galo Kronan waa la ilaa-lin/waardiyeyn doonaa. Mudada lagu jiro xiisadaha/casharka waa la qufulayaa iridaha oo dhan
- Waxaa jiri doona in waardiyayaal iyo shaqaalaka dugsigu ay wareegaan Kronan banaankiisa ulajeedaduna waa in kor loo qaado xasiloonida.
- Dhamaan caruurga iyo ardayda u baahan caawimaad, waxay ka heli doonaan caawimaad iyo taageero bar-baariyayal (pedagoger), la taliyayaal (kuratorer), maan-dhayeyaal (psykologer) iyo shaqaale kale oo ka socda caafimaadka ardayda (elevhälsan)

Si caruurga iyo ardayda loogu abuuro degenaansho iyo xasilooni dheeri ah, waxaa uu Kronan u furna-an doonaa oo kaliya caruurt, ardayda iyo shaqaale la idmaday. Waalidiinta iyo waalid masuuladu waxaan ku soo dhaweynaynaa in ay yimaadaan dugsiga wakhtiyada fasax ee Kronan (Kronans Fritidsgård), waxaana halkaas sidoo kale joogi doona shaqaale diyaar idinla ah taageero iyo wadahadal.

Jadwalka maalinta ugu horeysa dugsiga, isniinta 2/11

09:00 subaxnimo waxaa dugsiga loo furayaar ardayda oo lagu qaabili doono fasaladooda iyo lookaala-dooda caadiga ah. Qadada waxaa loo cuni doonaa sida ku xusan jadwalka caadiga ah Waalidiinta iyo waalid masuuladu waxaan ku soo dhaweynaynaa in ay yimaadaan dugsiga wakhtiyada fasax ee Kronan (Kronans Fritidsgård).

13:00 duhurnimo waxaa dhamaanaya maalin dugsiyeedka. Laakiin Kronan wuu u sii furnaanayaa ardayada rabta iney sii joogaan ilaa 15:00 galabnimo
Dugsiga wakhtiga fasaxa wuxuu furnaanayaa sida xusan jadwalka caadiga ah.



Jadwalka talaadada/salaasada 3/11

09:00 subaxnimo waxaa dugsiga loo furayaa ardayda. Qadada waxaa loo cuni doonaa sida ku xusan jadwalka caadiga ah.

13:00 galabnimo waxaa dhamaanaya maalin dugsiyeedka. Laakiin Kronan wuu u sii furnaanayaa ardayada raba iney sii joogaan ilaa 15:00 galabnimo

Jadwalka arbacada 4/11

Laga bilaabo arbacada 4/11 wuxuu dugsigu hawsha waxbarasho u wadi doonaa sida ku xusan jadwalka caadiga ah.

Djeno Mahic
Maamulaha Kronan

Birgitta Lundskog,
ku simaha agaasimaha ee xarunta dhexe
ee dugsiyada (Områdeschef, Centrala
skolområdet)